

Tallaalka Corona



Muxuu yahay tallaalka Corona

Tallaalka Corona wuxuu kaa badbaadinaayaa fayruska-Corona. Waxaa tallaalka lagu siinayaa qaab cirbad oo garabka lagu mudo. Tallaalka ka dib ma xanuunsaneysid ama wax yar ayaa fayruska ku xanuunsan kartaa.

Maxaa jirkaaga gudahiisa ka dhacaaya

Tallaalka ayaa sababaaya inuu jirkaaga sameeyo difaac fayruska ah. Markaasoo jirkaaga uu aqoonsanaayo fayruska tallaalka ka dib. Markaasi jirkaaga dhaqso ayuu fayruska u dilaayaa. Adiga ma xanuunsaneysid ama xanuun aan badnayn ayaa yeelaney.

Weli lama oga inta uu tallaalka jirkaaga uu ka badbaadinaayo Corona.

Ma yahay mid amaan ah

Tallaalka si dhaqso ah ayaa loo sameeyey. Taasi waxaa keenay in dad badan oo dunida oo dhan iney tallaalka si wadjir uga shaqeeyeen. Ma jiraan waxyaalo laga tagay. Taasi ma dhaceyso, waayo nidaamka u degsan sameynta tallaalka waa kuwo aad u adag.

Markii tallaalka diyaar noqdeen, dad badan ayaa lagu tijaabiyey. Ka dibna waxaa soo ansaxiyey ururada EMA iyo CBG.

Hadda tallaalka waa la isticmaalaa welina waa la baaraa amaankiisa.

Waxyaalaha uu keeni karo

Sida dhamaan tallaalka kale ayaa xanuuno kala kulmi kartaa tallaalka ka dib. Taasi waxaa lagu magacaabaa waxyaalaha uu kugu keeni karo.



Waxaa tusaale ahaan aad yeelan kartaa:

- Xanuun meesha lagaa muday
- Madax xanuun
- Daal
- Murqo xanuun
- Xumad /qandho

Xanuunadan waxey badiyaa soconayaan 1 ilaa 3 beri.

Kuwani waa waxyeelo fudud oo ay reebaan. Sida badan wey jiraan haddana dhowr beri ka dib wey baaba'aan .

Waxyeelo aad u daran waa mar dhif ah. Laakiin haddii aan xanuuno isku aragto wiigaga tallaalka ka dib, waxaa wacdaa dhaqtarkaaga qoyska.



Yaa qaadanaaya tallaalka ama la tallaalayaa

Waxaa qof walba oo laga bilaabo 18 jir sameysan karaa ballan. Taasi waxaa laga sameyn karaa internetka tooska ama telefoonka. Internetka tooska ayaa ballan ka sameyan kartaa: www.coronavaccinatie-af-spraak.nl. Taleefoonka waxaa ballan ka sameysan kartaa nambarka: 0800 7070 Waxaa jira tallaalo noocyo kala duwan.

Adiga ma dooran kartid nooca tallaalka aad rabto. Dhamaan tallaalka la isticmaalaayaa waa la soo tijaabiyey iyo waa la soo ansaxiyey.



Goorma aadan is tallaaleynin

Dhaqtrkaaga qoyska wac haddii aad:

- hore xasaasiyad aad ka qaaday tallaalka aad qaadatay ka dib
- aad tallaalka 1aad ka dib aad xasaasiyad daran aad yeelatay

Waxaa fiican inaad tallaalka dib u dhigto oo aad ballan cusub sameysato haddii :

- haddii aad aad u jiran tahay maalinta talaalka
- aad leedahay xumad 38 darajo ama ka badan
- aad qabto corona
- aad leedahay calaamadaha badiyaa lagu arko Corona
- haddii aad baaritaan corona sameysey oo aadan weli ogayn natijada
- haddii aad la xariirtay qof qaba corona



Uurka

Koox dhaqaatiiro iyo aqoonyahanno ayaa baaritaan ka sameeyey tallaalka iyo uurka.

Taladooda waa in dhamaan dumarka uurka leh ay iska talaali karaan Corona.

Tallaalka ka dib

Tallaalka ka dib waa inaad weli sii raacdaa tallooyinka guud, sida dhaqida gacmaha iyo kala fogaanshaha.

Haddii aad yeelato xanuuno Corona ah, markaa isa soo baar.

Lama yaqaan inaad tallaalka ka dib aad fayruska dad kale qaadsiiin kartid.

Waxaa jira rajo ah inaad weli ku xanuunsan karto fayruska.



Ma qabtaa su'aalo kale oo ku saabsan Corona fayruska:

La xariir **0800-1351**

Deze begrijpelijke informatie is gebaseerd op de adviezen van Rijksoverheid.nl en informatie van het CBG.

De informatie is getest met taalambassadeurs van Stichting ABC.

25 juni 2021 - versie 5